


BISMILAAHI RAXMAANI RAXIIM.



Ujeedo: Hambalyo iyo bogaadin ku socota Prime Minister-ka Dawlada Federaalka ah ee dalka Itoobiya mudane Dr Abiy Ahmed oo ku guulaystay Abaalmarinta Nobel Peace Prize 2019.



Salaadiinta, Ugaasyada, Boqorada, Cuqaasha, saraakiisha, siyaasiyiinta, aqoonyahanka, Ganacsatada, Dhalinyarada iyo Haweenka beelweynta Direed ee ku bahoobay golaha iyo Ururka MIDNIMADA Direed, waxay halkan hambalyo iyo bogaadin aan la soo koobinkarin uga soo dirayaan Prime Minister-ka dalka Itoobiya mudane Dr Abiy Ahmed oo ku guulaystay Abaalmarinta **Nobel Peace Prize 2019**

Mudane Dr Abiy Ahmed oo ku mutaystay Abaalmarintaas sida lagu xusay bayaankii ka soo baxay gudiga Nobel Peace Prize ee dalka Norway, soo afjaridii colaadii udhexsaday dalka Itoobiya iyo Eritrea, isbedlka dhinaca demoqraadiyada, xoriyatul qawlka, siidaynta maxaabiistii uxidhnaa siyaasada iyo weliba heshiisyada nabada ee xukuumadiisu la gashay jabhadihii hubaysnaa.

Hogaanka iyo xubnaha Ururka MIDNIMADA Direed (UMD) waxay sidoo kale u mahadnaqayaan gudiga Nobel Peace Prize-ka dalka Norway ee u gartay Abaalmarintaas Mudane Dr Abiy Ahmed.

Sidoo kale Ururka MIDNIMADA Direed (UMD) waxay ku hambalyeynayaan Abaalmarintaas dhamaan shacabka iyo Xukuumada dalka Itoobiya.

Ibrahim A. Adan
Gudoomiyaha Ururka MIDNIMADA Direed